

Soo koobid

Miisaaniyadda dowladda federaalka Soomaaliya ee 2022 ayaa baarlamaanka ku ansixiyay kalfadhi wadajirka ah 30-kii Juun 2022. Ansixintan ayay ahayd in la sameeyo isbuuca ugu dambeeya ee Diseembar sanadkii hore. Sababo la xiriira doorashooyinkii dadbanaa ee markaas socday awgood, ansixinta miisaaniyaddu waxay dib u dhacday lix bilood. Miisaaniyadda 2022-ka waa \$929.9 milyan, 27 boqolkiiba ayaa lagu kordhiyey miisaaniyaddii sanadkii 2021 oo ahayd \$671 milyan. Inkastoo halkudhigga miisaaniyadda sanadkaan uu yahay 'ku tiirsanaanta awooddeena dakhli', 73.2 boqolkiiba miisaaniyadda (\$694.7 milyan) ayaa laga filayaa deeq-bixiyeyaasha oo ku bixinaya taageero mashaariic (\$485.5 milyan ama 52 boqolkiiba) iyo kab miisaaniyadeed (\$209.2 milyan ama 22 boqolkiiba). 34.8 boqolkiiba miisaaniyada ayaa loo qorsheeyay gaarsiinta adeegga bulshada; 18.3 boqolkiiba waxay ku bixi doontaa hay'adaha difaaca iyo amniga, halka 8.9 boqolkiiba loo qoondeeyay hay'adaha horumarinta dhaqaalaha. Inkastoo miisaaniyadda dowladda ay ku korortay qiyaastii \$816 milyan 9-kii sano ee lasoo dhaafay, in ka badan kala bar miisaaniyadda (52 boqolkiiba) ayaa ah mashaariic deeq-bixiyeyaal lacagtooda bixinayaan. Faalladan kooban waxa aan ku qiimeyneynaa miisaaniyadda dowladda federaalka ee 2022 ee amniga, adeegyada bulshada, iyo horumarinta dhaqaalaha. Waxa aan kusoo gunaanadeynaa talooyin tixgelin mudan.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2022 Somali Public Agenda

Falanqeyn miisaaniyadda 2022 ee dowladda federaalka Soomaaliya ee halka bilyan ku dhaw

Hordhac

Muddo-xileedka dastuuriga ah ee baarlamaanka federaalka wuxuu dhamaaday 27-kii Diseembar 2020. Soomaaliya waxay ku dhex jirtay doorashooyinkii dadbanaa ee baarlamaanka bishii Diseembar 2021, mana jirin baarlamaan sharci ah ee ansixin karay miisaaniyadda 2022. Barlamaanka cusub waxaa la dhaariyay 14-kii Abriil 2022 iyadoo hoggaanka baarlamaankana dhaarinta kadib la doortay.

Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxay isticmaaleysay miisaaniyad kumeelgaar ah (contingency budget) saddexdii bilood ee ugu horreeyay sanadkan 2022. Bartamihii bishii Maarso, Golaha Wasiirrada ayaa ansixiyay miisaaniyad \$206.5 milyan ah oo loogu talo-galay bilaha Abriil, May iyo Juun iyadoo la filayay in marka la gaaro bisha Juun uu baarlamaanka cusub ansixin doono miisaaniyadda guud ee 2022. May 26, Golaha Wasiirrada ayaa ansixiyey miisaaniyad ah \$918.7 milyan oo loogu talagalay sanadka 2022. Kadib saddex maalmood oo kulan wadajir ah ee labada aqal ee baarlamaanka oo ay xubnaha labada gole su'aalo ka weydiyeen Wasiirka Maaliyadda xisaab-xerkii miisaaniyadidhii sanadihii hore – oo ay markii dambe u saareen guddi – xubnaha labada aqal ee baarlamaanka ayaa ansixiyay miisaaniyadda dowladda federaalka 30-kii Juun 2022.

Wadarta guud ee miisaaniyadda sanad-maaliyadeedka 2022 waa \$929.9 milyan. Miisaaniyaddan waxa ay \$258 milyan ka badan tahay miisaaniyaddii sanadkii hore oo ahayd \$671 milyan, taasoo lafteedu \$195 milyan ka badneyd miisaaniyaddii sanadkii 2020 oo ahayd \$476 milyan. Miisaaniyadda la meel mariyay ayaa \$11.2 milyan ka badan miisaaniyaddii (\$918.7 milyan) ay ansixiyeen Golaha Wasiirrada. Tani waxay muujineysaa awoodda baarlamaanka, oo dib-u-eegis ku sameeyay qeybo ka mid ah miisaaniyadda. Baarlamaanka, tusaale ahaan, wuxuu kordhiyey miisaaniyadda difaaca iyo amniga oo lagu daray ilaa \$2.7 milyan, waxaana uu u sameeyay miisaaniyad dhan \$836,520 Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed oo miisaaniyadda ay ansixiyeen golaha wasiirrada aanay wax miisaaniyad ah u qoondeyn.

Somalia Budget Proposals Between 2013 and 2022

Over the last ten years, the annual government budget has progressively increased reaching almost a billion in 2022. Yet, 73 percent of the budget is expected from budgetary and project support from bilateral and multilateral donors.




Chart: Somalia Public Agenda (SPA) • Source: MoF - Budget Document • Created with Datawrapper

Halkudhigga miisaaniyadda sanadkaan ayaa ah 'ku tiirsanaanta awooddeena dakhli'. Dakhliga gudaha ee la filayo in lasoo xareeyo ayaa ah \$250 milyan (26 boqolkiiba ee miisaaniyada), kaasoo la filayo in uu ka yimaado canshuurta dakhliga, macaashka, badeecadaha iyo adeegyada, iyo ganacsiga caalamiga ah. Tani waxa ay la micne tahay in dowladda ay fileyso hoos-u-dhac \$10 milyan ah ee dakhligii gudaha ee la qorsheeyay sanadkii 2021 oo ahaa \$260.1 milyan. Waxaa arrinkan lagu fasiri karaa in dowladdu ay saadaalinteeda u dhawaysay runta maadaama dakhliga gudaha ee lasoo xareeyay 2021 uu ahaa \$229.6 milyan (oo \$30.5 milyan ka hooseysay saadaashii la sameeyay).

Wadarta \$694.7 milyan oo ay deeq bixiyeyaal ku bixinayaan kabka miisaaniyadda (\$209.2 milyan ama 22 boqolkiiba miisaaniyadda) iyo mashaariic (\$485 milyan ama 52 boqolkiiba miisaaniyadda) ayaa la filayaa in lagu dhamaystiro dakhliga gudaha. Tani waxa ay ka dhigan tahay in ay \$283 milyan ku korortay ku talagalkii lacagta deeq bixiyeyaasha sanadkii hore oo ahayd \$411.7 milyan. Dowladdu waxa ay dabooleysaa kaliya 26.8% miisaaniyad sanadeedka halka inta soo hartay oo 73.2% ah ay bixin doonaan deeq-bixiyeyaasha caalamka.

Inkastoo halkudhigga miisaaniyaddu yahay 'ku tiirsanaanta awooddeena dakhli', miisaaniyadda ayaa si cad u muujineysa ku tiirsanaanta baahsan ee tageerada miisaaniyadeed ee ka imaanaysa wadamada iyo ururada caalamiga ah. Inkastoo miisaaniyaddu ku dhawaatay hal bilyan markii ugu horreysay, kororkani wuxuu ka turjumayaa kororka taageerada mashruucda ee deeq-bixiyeyaasha, kamana turjumayo kororka awoodda dakhli uruurinta ee dowladda.

Qeyb muhiim ah oo ka mid ah miisaaniyadda (\$323.7 milyan ama 34.8 boqolkiiba) ayaa loo qoondeeyay gaarsiinta adeegga bulshada. \$170.3 milyan (ama 18.3 boqolkiiba) waxaa loo qorsheeyay hay'adaha difaaca iyo amniga. \$83 milyan (ama 8.9 boqolkiiba) ayaa loo qoondeeyay hay'adaha horumarinta dhaqaalaha.

Somalia Budget 2022: Allocation by Ministry & Agencies

More than 70 percent of the entire budget has been allocated to just 5 ministries: labour, finance, defence, national security and health.




Chart: Somali Public Agenda • Source: MoF - Budget Documents • Created with Datawrapper

Miisaaniyadda 2022 ee dowladda federaalka ayaa u qoondeeyay \$323.7 milyan shan wasaaradood oo ka shaqeeya adeegyada bulshada oo kala ah Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Wasaaradda Waxbarashada, Wasaaradda Caafimaadka, Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha, iyo Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha. Waxa ay ka dhigan tahay 34.8 boqolkiiba miisaaniyada guud. Waa koror aad u badan oo ay tahay in la bogaadiyo. Sanadkii 2021, miisaaniyadda adeegyada bulshada waxay ahayd \$109 milyan (16.2 boqolkiiba wadarta miisaaniyadda), taasoo macnaheedu yahay in ay \$214 milyan (in ka badan labalaab) kordhintay miisaaniyadda adeegyada bulshada. Saddex sano kahor, sanadkii 2019, miisaaniyadda dowladda u qoondeeyay dhammaan wasaaradaha adeegyada bulshada waxay ahayd \$26.4 milyan.

Hal sabab oo keentay in sare loo qaado miisaaniyadda adeegyada bulshada waa kororka mashaariicda deeq bixiyeyaasha taageeraan ee la xiriira shaqada iyo arrimaha bulshada. Miisaaniyadda shaqaalaha iyo arrimaha bulshada ee sanadka 2022 waa \$231.7 milyan. Tani waxa ay \$187.1 milyan ka badan tahay miisaaniyaddii sanadkii hore oo ahayd \$44.6 milyan. Sikastaba ha noqotee, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada miisaaniyaddeeda waa keliya \$1.7 milyan. \$230 milyan waa mashaariic ay deeq bixiyeyaal maalgelinayaan.

\$157.2 milyan oo kamid ah miisaaniyadda ayaa loo qoondeeyay mashruuca [Baxnaano](#). Waxaana lagu maalgalinayaa deeq ka imaanaysa International Development Association (IDA) oo ka tirsan Bangiga Adduunka, fulinta mashruuca baxnaano-na waxaa hormuud ka ah Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, ujeedkiisuna waa "in lacago loo qeybiyo qoysaska saboolka ah iyo kuwa nugul iyo in lagula tacaalo arrimo degdeg ah oo muhiimka ah". Mashruuca sidoo kale waxaa la rajeynayaa in uu sameeyo diiwaangelin bulsho oo ah ilaa 200,000 kun oo qoysas danyar ah oo u nugul dhibaatooyinka (1.2 malyan oo qof) kuwaasoo la rajeynayo in ay ka faa'ideysan doonan mashruucan.

Qeyb muhiim ah oo ka mid ah miisaaniyadda adeegyada bulshada (\$58.6 milyan) – qiyaastii 18 boqolkiiba – waxay ku bexaysaa Wasaaradda Caafimaadka (\$3.7 milyan) iyo mashaariic la xiriira caafimaadka oo ay kamid yihiin \$44 milyan ee uu Bangiga Adduunka ku bixinayo Mashruuca Damal Caafimaad (\$22 milyan) iyo Somalia COVID-19 Emergency Vaccination Project (\$22 milyan). Sannadkii hore, miisaaniyadda caafimaadka waxay ahayd \$33.6 milyan. COVID-19 ayaa ah mid kamid ah sababaha miisaaniyadda caafimaadku si weyn ugu kordhisay sanadihii ugu dambeeyay.

Hay'adaha waxbarashada waxay helayaan qeybta saddexaad ee ugu badan miisaaniyadda adeegyada bulshada (\$30.1 milyan). Miisaaniyadda waxaa loo qoondeeyay Wasaaradda Waxbarashada, Dhaqanka iyo Tacliinta Sare (\$8.4 milyan), mashaariicda waxbarasho oo ay deeq bixiyeyaasha maalgelinayaan (\$12.1 milyan), Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (\$7.2 milyan), Akademiyada Sayniska iyo Fanka Soomaaliyeed (\$ 1.1 milyan) Akaadamiyada Afka Soomaaliga (\$ 1.4 milyan).

Inkastoo miisaaniyadda guud ee waxbarashadu ay kordhaysay \$1 milyan, miisaaniyadda Wasaaradda Waxbarashada oo ahayd \$10.5 milyan sanadkii 2021 ayaa la dhimay lagana dhigay \$8.4 milyan sanadkan 2022. Hal

arrin oo hoos-u-dhacan la sameeyay loo sababeyn karo ayaa noqon karta in wasaaraddu ku wareejiyay Maamulka Gobolka Banaadir maareynta 24 iskuul ee ku yaalla Muqdisho. Miisaaniyadda Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed waa la dhimay iyadoo ahayd \$8.3 milyan sanadkii 2021 lagana dhigay \$7.2 milyan 2022 (\$1.1 milyan oo dhimis ah). Qeyb muhiim ah (\$12.1 milyan) ayaa loo qoondeeyay mashaariic waxbarasho, oo lahaa miisaaniyad dhan \$7.7 milyan sanadkii 2021. Mashaariicdaas waxaa kamid ah Somali Education Human Capital Project (\$3.1 milyan) ee uu maalgelinayo Bangiga Adduunka iyo Global Partnership for Education oo bixinaya \$1.5 milyan. Ma cadda cidda fulineysa mashaariicdaas iyo halka laga fulinayo.

Miisaaniyadda loo qoondeeyay Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqda Aadanaha ayaa ka kordhay \$990,644 milyan sanadkii 2021 milyan lana gaarsiiyey \$2.3 milyan sanadkan 2022. Sababta ugu weyn ee kororku waa \$1 milyan oo mashaariic ku bexaysa oo sanadkan kusoo kordhay. Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha ayaa waxyar lagu kordhiyey miisaaniyadeeda oo ahayd \$675,416 sanadkii 2021 lagana dhigay \$909,460 sanadkan 2022. Inkastoo Soomaalida intooda badan ay dhallinyaro yihiin, ma jiraan mashaariic dhalinyaro oo ay dalalka iyo hay'adaha taageera Soomaaliya maalgelinayaan oo hoos tagaya Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha.

Inkastoo ay tahay ifafaalo wanaagsan in miisaaniyadda adeegyada bulshada ay ka korortay \$8.3 milyan (2017) islamarkaana gaartay \$323.7 milyan (2022) muddo lix sano gudahood ah, kororkani kama turjumayso mudnaanta horumarinta adeegyada bulshada ee dowladda. Taas cagsigeeda, sare-u-kacan ayaa ka turjumaysa daneynta deeq bixiyeyaasha iyo maalgelintooda qeybaha caafimaadka, waxbarashada iyo arrimaha bulshada.

Miisaaniyadda hay'adaha difaaca iyo amniga

\$170.3-ka milyan ee loogu talagalay hay'adaha difaaca iyo amniga, \$99.2 milyan ayaa loo qoondeeyay hay'adaha difaaca halka \$71.1 milyan loogu talagalay hay'adaha amniga. Miisaaniyadda difaaca ayaa lagu kordhiyey \$3.5 milyan miisaaniyaddii 2021 oo ahayd \$95.7 milyan. Miisaaniyadda hay'adaha amniga (\$71.1 milyan) ayaa sidoo kale lagu kordhay \$3 miisaaniyaddoodii 2021 oo ahayd \$68.1 milyan. Tan macnaheedu waa in \$3.25 milyan celcelis ahaan loo kordhiyey hay'adaha difaaca iyo amniga.

Somalia Budget 2022: Security Sector Allocation

The gov't expects to spend about a quarter of the budget on the defence and security sector.

Other Ministries (81%) Defence (11%) National Security (8%)




Chart: Somalia Public Agenda (SPA) • Source: MoF - Budget Documents • Created with Datawrapper

Miisaaniyadda difaac ee \$99.2-ka milyan ah, \$1.3 milyan ayaa loo qorsheeyay Wasaaradda Difaaca. Tani waxay muujineysaa dhimista joogtada ah ee lagu sameynayay miisaaniyadda Wasaaradda Gaashaandhigga tan iyo sanadkii 2020. Miisaaniyadda Wasaaradda Gaashaandhigga ee 2019 waxa ay ahayd \$2.6 milyan. Inta badan miisaaniyadda difaaca (\$96.4 milyan) waxa ay ku bixi doontaa ciidamada qalabka sida; Sanadkii 2021, ciidamada qalabka sida waxay lahaayeen miisaaniyad dhan \$93 milyan (sidoo kale \$81.1 milyan ayuu ahaa miisaaniyaddooda sanadkii 2020). Maxkamadda ciidamada qalabka sida ayaa heli doonta miisaaniyad \$1.5 milyan ah, si lamid ah miisaaniyaddeedii 2021, 2020 iyo 2019. Agoonta ciidamada qalabka sida iyo ciidamada naafada ah waxaa loo qoondeeyay \$115,000, si lamid ah saddexdii sano ee lasoo dhaafay.

\$71.1-ka milyan ee miisaaniyadda amniga loo qoondeeyay, \$1.2 milyan ayaa loo qorsheeyay Wasaaradda Amniga Qaranka, oo qoondeeda la dhimay marka loo eego miisaaniyaddeedii \$1.9-ka milyan ahayd ee 2021. Miisaaniyadda inta ka hartay waxaa loo qoondeeyay hay'adaha kale ee ammaanka, oo ay kamid yihiin booliiska (\$46 milyan), NISA (\$18.5 milyan), Laanta Socdaalka (\$5 milyan), iyo \$282,235 oo ah mashaariic la xiriirta amniga.

Allocations for Defence and Security Agencies




Chart: Somali Public Agenda (SPA) • Source: MoF - Budget Documents • Created with Datawrapper

Marka la eego miisaaniyadda 2022, 18.3 boqolkiiba (\$170.3 milyan) ayaa loogu talagalay in lagu bixiyo amniga. Miisaaniyadda difaaca iyo amniga ayaan wax badan iska beddelin sanadihii ugu dambeeyay. Sanadkii 2021, miisaaniyadda difaaca iyo amniga ayaa miisaaniyadda guud ka ahaa 24.4 boqolkiiba. Hoos-u-dhaca boqolleyda ee miisaaniyadda difaaca iyo amniga oo sanadkan oo ah 18.3 boqolkiiba ayaa ka turjumeysa kororka miisaaniyadda ee qeybaha kale, gaar ahaan miisaaniyadda adeegyada bulshada.

Inkastoo miisaaniyad aan aad isku bedbeddelin loogu talagalay hay'adaha difaaca iyo amniga sanadihii lasoo dhaafay, amni darrada waa mid kamid ah caqabadaha ugu waaweyn ee Soomaaliya ka jira. Inkastoo la rajeynayo inta badan miisaaniyadda arrimaha aminga in lagu bixiyo kab-miisaaniyadeed oo ku yimaada hannaan labo geesood ah ama mid dhinacyo badan ah, haddana ma cadda sida miisaaniyadda amniga iyo difaaca ee sanadihii ugu dambeeyay ay wax uga beddelayaan guud ahaan ammaanka dalka.

Kobcinta dhaqaalaha iyo dakhliga

Dowladda federaalka Soomaaliya ayaa miisaaniyad sanadeedka 2022 u qoondeysay \$83 milyan (qiyaastii 8.9 boqolkiiba wadarta miisaaniyadda) hay'adaha horumarinta dhaqaalaha. Tani waxay ka dhigan tahay kororka \$20.6 milyan ee miisaaniyaddii \$62.4-ka milyan ahayd ee sanadkii lasoo dhaafay, taas oo lafteedu \$20.5 milyan ka badneyd miisaaniyaddii hay'adaha horumarinta dhaqaalaha ee sanadkii 2020 oo ahayd \$41.9 milyan (celcelis ahaan \$20.5 milyan ayaa ku kordheysay sanad kasta labadii sano ee ugu dambeysay).

\$6.7 milyan ayaa loo qoondeeyay guud ahaan Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha (\$1.3 milyan) iyo mashaariic la xiriira (\$5.4 milyan) oo hoos yimaada wasaaradda. \$1.5 milyan ayaa loogu talagalay Wasaaradda Batroolka. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed oo lahayd miisaaniyad \$0.5 milyan ah sanadkii 2021 ayaa miisaaniyad \$836,520 ah loogu talagalay sanadkan 2022. \$5.5 milyan ayaa loo qorsheeyay Wasaaradda Beeraha (\$2 milyan) iyo Wasaaradda Xannaanada Xoolaha iyo mashaariicda la xiriira (\$3.4 milyan). Miisaaniyaddii 2021 ee Wasaaradda Xannaanada Xoolaha ayaa ahayd \$1.6 milyan. Inkastoo qoondadii Wasaaradda la yareeyay lagana dhigay \$1 milyan sanadkan, mashaariicda la xiriira xoolaha ayaa loo qorsheeyay miisaaniyad \$2.4 milyan ah. \$2.8 milyan ayaa loogu talagalay hay'adaha ka shaqeeya arrimaha badda. Waxaa jira sare u qaadis yar ee lagu sameeyay miisaaniyadda Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha (\$4.6 milyan, waxa ay ahayd \$3.1 milyan sanadkii 2021). Wasaaradda Dekadaha ayaa iyana loo qoondeeyey \$2.6 milyan oo lamid ah isla miisaaniyaddeedii sanadkii 2021.

Miisaaniyadda Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada, oo ay kujirto Hay'adda Duulista Hawada, waxaa loo qoondeeyay \$17.7 milyan, oo aad ugu dhaw miisaaniyaddoodii 2021 oo ahayd \$17.4 milyan. Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta ayaa loo qoondeeyay miisaaniyad dhan \$3 milyan (oo ay ku jirto Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka), taasoo aad ugu dhaw miisaaniyaddeedii 2021 oo ahayd \$2.9 milyan. Taas beddelkeeda, waxaa jirta koror weyn oo ku yimid miisaaniyadda Wasaaradda Howlaha Guud iyo Dib-udhiska oo sanadkii hore ahayd \$14.6 iyadoo la gaarsiiyey \$31.3 milyan sanadkan 2022.

Inkastoo wadarta guud ee miisaaniyadda ee horumarinta dhaqaalaha ay kordhayaan sanadihii dambe, dakhliga gudaha ayaa weli hooseeya haba u sabab ahaadan culeysyada amni iyo awoodda dakhli aruurin ee laamaha dowladda ee ku shaqada leh howshan oo xaddidan. Waxaa sidoo kale xusid mudan in ilaha dhaqaale ee muhiimka ah sida beeraha, xannaanada xoolaha, iyo kalluumeeysiga aan miisaaniyad badan loo qoondeyn mudnaan badanna aan la siinnin.

Mustaqbalka

Tobankii sano ee lasoo dhaafay, miisaaniyad sanadeedka dowladda waxaa ku kordhay qiyaastii \$816 milyan (\$114 milyan sanadkii 2014; \$115 milyan sanadkii 2018; \$175 milyan sanadkii 2016; \$270 milyan sanadkii 2017; \$274 milyan. \$274 milyan 2018; \$344 milyan sanadkii 2019; \$476 milyan sanadkii 2020; \$671 milyan sanadkii 2021; iyo sanadkan oo ay tahay \$929.9 milyan).

Guud ahaan, waxaa dhiirigelin leh in miisaaniyadda adeegyada bulshada gaar ahaan iyo sidoo kale miisaaniyadda hay'adaha horumarinta dhaqaalaha ee dowladda federaalka si fiican loo kordhiyey sanadkan 2022. In miisaaniyadda ay gaarto ku dhawaad hal bilyan markii ugu horreysay ayaa sidoo kale dhiirigelin leh. Sikastaba ha noqotee, waxaa muhiim ah in la ogaado in boqolkiiba 73 miisaaniyadda ay tahay kab miisaaniyad iyo mashaariic ay taageerayaan deeq bixiyeyaal. Gaar ahaan, waxaa walwal leh in lacag ka badan kalabar miisaaniyadda (52 boqolkiiba) ay tahay mashaariic deeq-bixiyeyaal maalgelinayaan, oo ay dowlada federaalka ku lahaan doonto awood xaddidan maareeynta lacagahaas. Waxay arrintan sidoo kale xoojineysaa dhaqanka masuuliyiinta dowlada ee ceysiga mashaariicda iyo khilaafyada ka dhex dhaca wasaaradaha dowladda ee la xiriira wasaaradda ay hoos tagayaan mashaariicdan.

Intaas waxaa dheer, miisaaniyadda 2022 waxa ay baarlamaanku ansixiyeen 30-kii Juun 2022, sababo la xiriira doorashadii dadbaneyd ee daba dheeraatay. Sidoo kale, miisaaniyadaha saddexdii sano ee la soo dhaafay si rasmi ah uma aanu xerin baarlamaanka federaalka, mana jiro wax cadeyn ah oo muujinaya in lacagaha la qorsheeyay loo isticmaalay sidii loo qorsheeyay.

Somali Public Agenda (SPA) waxay 5-tii sano ee lasoo dhaafay faallooyin ka qoreysay miisaaniyadda sanadlaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya si muwaadiniintu ula socdaan arrimaha ay dowladdu mudnaanta siineyso. Sikastaba ha noqotee, marka lagasoo tago falanqaynta sida miisaaniyada loogu qoondeeyay hay'adaha dowladda – taasoo muwaadiniinta ka caawineysa in ay fahmaan mudnaanta dowladda – ma ogaan karno sida loo fuliyey miisaaniyadihii sanadahii hore. Sidaas darteed, isla xisaabtan iyo daahfurnaan waa in ay mudnaanta siisaa dowladda cusub.